

MAGAALADA PORTLAND

BARNAAMIYADA GARGAARKA DAYNTA IYO DEEQDA GANACSIYADA EE COVID-19

Amaahda Ganacsiga Magaalada iyo barnaamijyada deeqda ee Magaalada Portland waxaa loogu talagalay inay ku bixiso kaalmo maaliyadeed ganacsiyada Portland ee ay saameysay COVID-19. Tan waxaa ka mid ah meheradaha oo wali furmay, qaar ka xanaajiyey qaar ama dhammaan shaqaalahooda, ganacsiyada si ku meelgaar ah u xirnaa, iyo kuwa dib u furmaya.

Sideen u codsadaa?

- Codsiga iyo warbixin dheeraad ahba waxa laga heli karaa: www.edd.portlandmaine.gov
- Haddii aad wax su'aal ah qabto, la xiriir nrh@portlandmaine.gov
- Codsiyada waa la aqbalaa ilaa ay lacagtu ka dhammaato

Barnaamijyadeen codsaddaa?

Si aad u go'aansato barnaamijyada kugu habboon, marka hore go'aanso inta qof ee shaqaale buuxa (FTE)* wax yar ka hor masiibada faafa:

- 0-1 shaqaale - Microenterprises Grant
 - Deeq gaarraysa ilaa \$5,000
 - Hantiiluhu waa inuu yahay dadka dhaqaalaha hooseeya/dhexdhexaadka ah**
- 2-15 shaqaale - Rapid Response Microloan (Deynta Yar ee Dagdagga ah)
 - Deyn gaaraysa ilaa \$10,000 oo 0% dulsaar leh ilaa 2 sano, dayn celintu waxay bilaabanaysaa 6 bilood ka dib marka la saxeexo
 - Ilaa \$5,000 waa la cafiyi karaa haddii dib loo shaqaaleeyo/la reebo 50% shaqaalaha
 - < \$1 milyan oo beecshiro ah
- 2+ shaqaale- COVID-19 Gargaarka Ganacsatada ee dib u shaqaalaysiinta
 - Deeq gaaraysa ilaa \$10,000
 - Dib loo shaqaaleeyo ilaa 4 ama in ka badan oo ah shaqaale buuxa
 - Shaqaaluhu waa inay yihiin dadka dakhliga hooseeya/dhexdhexaadka ah**

Haddii ganacsigaagu uudan ku oollin Portland laakiinse uu ku yaallo degmada Cumberland, waxad codsan kartaa GPCOG Rapid Response Program (Deeqda Dagdagga ah) www.gpcog.org/422/Loan-Programs

Qeexdim

*1 FTE (shaqaale buuxa) wuxu la mid yahay ugu yaraan 34 saac/todobaadkii ama 2 shaqaale xilli dhiman oo midkiiba leeyahay 17 saac/todobaadkii ugu yaraan

**dakhli hoose/dhexdhexaad ah waxa lagu qeexaa 80% celceliska dakhliga qoyska dhexdhexaadka ah ee qiyaasta Wasaaradda Guriyeynta iyo Horumarinta Magaalooyinka. Jaantus muujinaya dakhliga la oggolyahay waxaad ka heli doontaa website ka hoos ku qoran: <http://www.portlandmaine.gov/DocumentCenter/Home/View/8939>

Maxaan dhaqaalahan u isticmaali karaa?

- Raasmaalka aad ku shaqayso (sida, kiro, adeeg, mushahar, caymis/insurance, inventory);
- Iyo waxyaabo kale iyadoo ku xiran hadba barnamijka
- Dayn hore oo lagu bixiyo;
- Hormaris dayn cusub;
- Lacagta hantiiluhu iskama qaadan karo;
- Waxa jira waxyaabo kale oo mamnuuc ah

Maxaan u baahan doonaa si aan u codsado?

Waa inaad arjigaaga soo raaciso sharciyada ay ka mid yihiin:

- Mushahar bixinta oo muujinaya tirada shaqaalaha buuxa iyo waqti dhimanba wax yar ka hor xiisadaha COVID-19;
- Hantida shakhsi ahaaneed ee milkiileyaasha leh saami 20% ama
- Canshuur celintii 2019
- Xisaabxirkii 2019 iyo khasaare iyo faa'iido

Maxaa dhacaya markaan codsiga xaraysto

Shaqaaluhu waxay dib u eegi doonaan codsi kasta si ay u habsadaan inuu dhammaystiran yahay. Dayn qaybiye ayaa dib u eegaya, ka dibna warbixin u diyaarinaya Laanta Horumarinta ee Portland (PDC), ee xubinta amaahda bixisa ee Magaalada. PDC waxay dib u eegi doontaa warbixintaas, ka dibna waxay aqbali doontaa codsiga ugu habboon. Dadka arjigooda la aqbalay waxay shaqaalaha magaalada kala shaqayn doonaan saxeexa heshiiska ee barnamijkan. Daymuhu waxay u baahan yihiin:

- Dammaanaqaad dhammaystiran oo ay bixiyaan dhammaan dadka leh saami 20% ama in ka badan
- Caddaynta Daymaha lagu leeyahay hantida



Wixii faahfaahin dheeraad ah iyo ilo kale oo deegaanka ah, kala soco: www.edd.portlandmaine.gov

PORTLAND
of Opportunity